



COVID-19 Nadaamka ku noqoshada Dugsiga

Truganina College

SOOJEEDIN

Ujeedada sharcigaani waa in hoosta laga xariiqo sida kuleejadeena looga maarayn doono khatarta la xiriirta Coronavirus (COVID-19) intii lagu jiro isdhexgalka ka dhexeeya ardada, waalidiinta iyo shaqaalaha mudada ku soo noqoshada dugsiga teerma 2aad, ee 2020.

Kuleejada Truganina (Truganina College) waxaa ka go'an inay bixiso bay'ad amaana oo waxbarasho iyo bay'ad shaqo oo ardadeena iyo shaqaalaha. Waxaanu weydiisanaynaa dhamaan bulshada dugsiga si loola socdo in nadaamku noo suurtageliyo in aan bixino bay'ada ugu nabdoon inta waqtigaan lagu jiro. Dhamaanteen waxaan leenahay door la qaato si loo joojiyo fiditaanka COVID-19 Fiktooriya dhexdeeda.

ASALKA

Kuleejada Truganina waxay raacaysaa talada Wasaarada Waxbarashada iyo Barbaarinta oo ay ku jiraan, [talada caafimaadka iyo amaanka si loogu noqdo wax ku barashada goobta iyada oo lagu jiro COVID-19](#) kaas oo laga heli karo Wasaarada [Coronavirus \(COVID-19\) websaytkeeda](#).

BAAXADA

Nadaamkaani wuxuu khuseeyaa qof walba oo jooga Truganina College. Kan waxaa ka mid ah xubnaha shaqaalaha (maamulayaasha, macalimiinta iyo shaqaalaha kaalmada waxbarashada) dhamaan waalidiinta/daryeellayaasha kuwaas oo la shaqeeya kuleejada iyo ardada. Waxaa kaloo ku jira kuwa soo booqanaya kulleejada.

SHURUUDAHA

Imaanshaha goobta.

Wasaarada waxbarashada iyo Barbaarinta (DET) waxay ku talisaa in:

Malaha ficilka ugu fiicani ee jaalliyada dugsigu samayn karto si hoos loogu dhigo khatarta gudbinta coronavirus-ka (COVID-19), ay tahay in la xaqiijiyo in shaqaale kasta oo aan fiyoobayn, carruur iyo dadka dhalinta yar ay joogaan guriga.

Iyada oo khatarta gudbinta fayrasku ay aad u hoosayso, shaqaalaha iyo ardada ayaa ugu helis badan jirooyinka daran haddii qofqof loo qiimeeyo ku haboonaanta imaanshaha goobta waqtigaan iyaga oo kaalmo ka helaya dhakhtarka caafimaadka.

Maadaama khatarta ugu weyn gudbinta ee coronavirus-ka (COVID-19), oo bay'ada dugsigu ay u dhexayso dadka waaweyn, waa muhiim in booqdayaasha dugsigu ay ku egyihiin kuwa bixinaya ama kaalmaynaya adeegyada iyo hawlaha dugisga.

Taas macneheedu waxa weeye kuleejadeena:

- Dhamaan shaqaalaha aan fiyoobayn iyo ardada **waxa waajib** ku ah inay joogaan guriga.
- Waalidiinta/daryeellayaasha qaba baahi ballaaran oo caafimaad (oo ay ku jiraan kuwa

qaba dhibaato difaac jireed), waxaa waajib ku ah inay talo ka raadiyaan dhakhtarka kaalmada ardada.

Go'aan ka gaarida haddii wax ku barashada goobtu ay ku haboon tahay, iyada oo la qadarinayo in taladani ku xiran tahay xaallada safmarka ah ee coronavirus-ka (COVID-19) ee Fiktooriya gudaheeda. Tani waxay la socotaa [Nadaamka Baahida Daryeelka Caafimaadka ee DET](#)

- Booqdayaasha kuleejada waxay ku ekaan doonaan kuwa keenaya ama kaalmaynaya adeega asaasiga ah ee hawlaha dugsiga (sida caafimaadka ardada iyo adeegyada samaqabka, kuwa ku takhasusay barnaamijka manhajka, shaqaalaha dayactirka).
- Shaqaalaha weheliya, kuwaas oo ay ku jiraan waalidka tabaruca bixiya, ayaa lagu wargelinayaa in aanay imaan dugsiga waqtigaas. Xarakaadyada ku xiran iyo waalidka ku lugta leh (sida waalidka subaxnimada 1:1 akhriska, tabarucayaaasha maamulka, iyo tabarucayaaasha munaasabadaha dhaqaale ururinta) ayaa la baajiyey ilaa ogeysiin dambe.
- Waxaanu weydiisanaynaa waalidiinta/daryeellayaasha doonaya inay kala hadlaan xubnaha shaqaalaha inay isticmaalaan xalka telefoonka ama emailka. Haddii kulan waji-waji ah loo baahan yahay (sida kulan macaliimiin iyo waalid), waa in la raaca shurudaha kala-durugsanaanta bulshada oo ah 1.5m labada qof oo waaweyn.
- Guddiga Ugu-weyn ee Difaaca Caafimaadka Australia wuxuu ku taliyey tiradii horay loogu taliyey ee ahayd 10 arday fasalkiiba looma baahna hadda sidaas darteed fasaladu waxay ku shaqaynayaan **tiradii fasalka ee caadiga ahayd**.
- Makhaayadu waxay u furnaanaysaa qado dalbasha oo ONLINE ah keliya. Waxyaallaha fudfudud ee asaasiga ah ayaa la gadan karaa waqtiga fasaxa, dhamaan qadada kulaylka iyo qabowga ah ayaa lagu heli karaa online keliya.
- Dhamaan xarakaadyada dugsiyada u dhexeeya oo ay tahay inay yimaadaan ardadu goobta iyaga oo ka imanaya dugsii kale (cayaaraha ardada ka dhexeeya) ayaa ama ka dhici doona ama la baajin doonaa.
- Isu imaadka dugsiga, banaan u bixida gaaban, kaamamka iyo isu soo ururka ballaaran ee aan muhiimka ahayn ayaa dib loo dhigi doonaa. Kuwan waxaa ku jira macluumaadka habeenimada ee 2021 iyo dalxiiska dugsiga, kaas oo macluumaadka ku bixin doono online-ka.

Imaanshaha dugsiga iyo ka tegida

DET waxay ku talisaa:

Maadaama khatarta ugu weyn oo coronavirus (COVID-19) ee bay'ada dugsigu ay tahay dad waaweyn, isu dhowaanshaha u dhexeeya xubnaha bulshada dugsiga waa in laga fogaadaa, khaasatan waqtiga keenida iyo qaadida ilmaha.

Taas macneheedu waxa weeye kuleejadeena:

- Waxaan weydiisanaynaa shaqaalaha/waalidiinta inay la socdaan inta la isu jirayo oo dhan 1.5mitir dadka waaweyni iyo albaabada qolalka waxbarashada, iyada oo la xaqiijinayo in aanay isugu imaan dugsiga agagaarihiisa meelahaas waxaa ku jirta goobta gaari dhigashada ee dugsiga.
- Si hoos loogu dhigo isdhexgalka ardada iyo dadka waaweyn dugsiga dhexdiisa iyo meelaha laga galo ee aan joogno:
 - Qaadista kala go'go'an oo waqtiga qaadista ardada waxay bilaaban doontaa Talaada 26da May, 2020 ardada diyaarka u ah in laga qaado:
 - Asaaska 2:50pm
 - sanadka 1aad
 - 2:55pm
 - Sanada 2aad 3:00pm
 - Codsashada in waalidiintu geli karaan keliya dugsiga markay lagama maarmaan tahay

in sidaas la sameeyo oo lala xiriiro dugsiga iyada oo telefoon loo dirayo ama email markay ku haboon tahay

- Xirida dhamaan garoomada kubbada kolayga dugsiga ka hor iyo ka dib
- Dhiirigeli isa salaamida aan la istaabanayn.

Saxada

DET waxay ku talisaa:

Qof walbaa waa xafidi karaa naftiisa waana ka hortegi karaa fiditaanka coronavirus-ka isaga oo joogto u sii wadaya gacan nadiifin waxtar ah.

Kulleejadayada:

- Dhamaan shaqaalaha iyo ardadu waxay fulin doonaan ilaalinta saxada gacanta, khaasatan marka dugsiga la yimaado, cunta cunida ka hor iyo ka dib, markay duufsadaan, qufacaan, hindhisaan ama isticmaalaan musqusha. Waxaa arrintaan maarayn doona ama kormeeri doona shaqaalaha haddii loo baahan yahay.
- Meesha aan laga helayn saabuun iyo biyo, gacan nadiifinta ayaa la heli doonaa.
- Shaqaalaha ayaa xaqiijin doona in gacma nadiifiyaha la buuxiyey ka hor inta aanu dhamaan.
- Ardada **waajib** waxaa ku ah inay keenaan dugsiga dhalooyinkooda biyaha si loo isticmaalo (dibna loogu buuxiyo). Waxaa lagu talinayaa in ardadu aanay toos uga cabin isha biyaha (fountain) waqtigaan.
- Shaqaalaha iyo ardada waxaa la xasuusinaya inay shakhsiyan nadiifiyaan moobaylkooda si joogto ah. Nadaamka xeerinaya moobaylka ayaa shaqaynaya sidaas darteed ardadu ma taabanayaan moobaylkooda inta dugsiga lagu jiro.
- Cunta wadaagida lama ogola.

Qabanqaabo mucayina oo bay'ada waxbarida iyo waqtiyada fasaxyada gaaban.

DET waxay ku talisaa:

Ilaalinta masaafada durugsan ee 1.5 mitir had iyo jeer suurtagal maaha waqtiga waxbarashada. Masaafada durugsani aad ayay muhiim ugu tahay dadka waaweyn dhexdooda.

Hoos u dhigida isku qasida kooxa kala duwan (fasalo ama heerar sanadeed) ayaa lagu talinayaa taxadar ahaan si hoos loogu dhigo khatarta fiditaanka gudbinta iyo xakamaynta gargaarka markay dhacdo xaallad aan qaalib ahayn ee goobta coronavirus (COVID-19).